

DHALINYAPOOY!

U RACA MUSTAQBAL DOOG LEH



Buuggaan majaajilada ah ayaa iftiiminaya safarka bulshooyinka deegaanka si ay uga gudbaan caqabadaha iyaga oo u maraya adkeysiga, wada hadal, iyo iskaashi. Waxaa taageeraya, Guddiga Adeegga Yurub ee Qalabka Siyaasadda Dibadda, waxay keenaysaa noloshu sida iskaashiga caalamiga ah uu awood u siin karo xalalka maxaliga ah ee nabad waarta iyo wada noolaanshaha deegaanka.

Ku biir tacaburkan soo jiidashada leh ee dhaqanka, diblomaasiyadda, iyo hal-abuurnimada waxay midoobaan si ay u qaabeeyaan mustaqbal ifaya ee adduunka ah.




Funded by
the European Union




20 SANNO KA DIB - MAALINTA HADDA LA JOOGA.



GORRAX OLOLAYSA HOOSTEEDA,
NEECAW AYAA GAROONKA KA
WAREEGAYSAA OO KU TUUREYSA CIID
INTA U DHAXEYSA LABBADA
KOOXOOD EE KUBBADDA CAGTA
AH KUWAASOO ISKUGU DHACASAN
CIYAAR KULLUL.



WAXAY NOGON KARTAA
MAALIN KULEYL AAN DABIICI
AHEYN, LAAKIIN KULAYLKA KA
IMAAANAYA TARTAMAYAASHAYADA
AYAA XITAA KA SII KULLUL.



LABADEENA KOOX KABTANADOODA
AYAA MIDBA MIDKA KALE ISHA KU HAAYA...

LIIBAAN, DHAWRSAN LAAKIIN
GO'AAN ADAG LEH. WAXA UU
U CIYAARAA WEERARYAHAN
KOOXDIISA.

BURHAAN, KALSOONI
IYO SOO JIIDASHO LEH.
DIFAACA AYUU LGU
CIYAARAA KOOXDIISA.


HERE COMES
LIBAN! HE STRIKES
LIKE A WARRIOR'S
SPEAR.



BURHAAN!
DIFAACIISU WAA
SIDA **GIDAAAR**
DHAGAX AH.

LIIBAAN OO SOO
DHEX MARA
DIFAACA WUXUUUNA
KU SOCDAY INUU
GOOL DHALIYO...

LIIBAAN TOOSIYAY
TOOGASHADIISA,
WUXUU U SOCDAA
INUU LAADO...




...LAAKIN
BURHAAN AYAA
KU BEEGNAA.



MAYA
DIRIR
KALE.






TAASI WAA QALAD!

TAASI WAXAY AHEYD DIFAAC. HA NOQON WAX JILICSAN.

JILICSAN?



JAWIGU WUU KACSAN YAHAY.



XAAJI WARSAME, MAXAAD IYAGA U JOOJIN WEYDAY?

WAXAY GARANAYAAN WAXAAN LA SAMEYN. KELIYA WAXAY DOORTAAN INAYSAN SAMEYNNIN.



MA GARANAYSID SIDA LOO CIYAARO CADAALAD!

WAXAA LAGA YAABA A INAADAN GARANEYN SIDA LOO CIYAARO GEBI AHAANBA.

MAR HADDII AAN KU GULLEYSANO KA MID NOQOSHADA CIYAARTIA MAGAALADA, WAXAAN BOOS KA HELI DOONAA GAROONKA WEYN! UMA BAAHAN DOONO INAAN LA CIYAARNO KOOXDAADA GURI LA'AANTA!

TANI WAA SABABTA KOOXAHA KALE EE MAGAALADA AYSAN KULA CIYAAREYNIN. WAXAAD U DHAQMEYSAA SIDII WIIL YAR, OO KA SOO JEEDA QABIIL YAR

BURHAAN IYO KOOXDIISA AYAA GAROONKA KA BAXAY. LIIBAAN KOOXDIISII WAY KALA FIRXADEEN.




AAMINA. AAN TAGNO.

XERADA BARAKACAYAASHA ...


BURHAAN WUU I JILAAFAY, SI HLA KAC AH!

HADDII LABADIINABA AAD JOOJISAAN DIRIRTA, WAXAAD LAHAAN LAHEYDEEN MADADAALO BADAN. BAL QIYAAS LABADIINA OO HAL KOOX KA TIRSAN... ADIGA OO WEERARYAHAN AH, IYO BURHAAN OO DIFAACA KA CIYAARAYA, WAXAAD NOQON LAHEYDEEN KUWO AAN LA JOOJIN KARIN.



MA DOONAYO INAAN MAR KALE LA CIYAARO BURHAAN! DHAB AHAANTII, MA RABO INAAN HALKAN JOOGO!

MA TIHID KAN KELIYA EE U XIISAY GURIGA!



XUSLUUSTA DHACDO HORE - SANNAD KA HOR....

" WAXAAN KA FEKERAYAA XOOLIHII AAN LAHEYN. WAXAAN KA FEKERAYAA SIDA AAN U FARAXSANEYN..."




XUSLUUSTA DHACDO HORE: 3 BILOOD KA HOR...

" LAAKIIN HADDA, TAAS WAXAA QAATAY CIIDDA, KULAYLKA IYO DHIMASHADA..."



WAXAAN HADDA JOOGNAA HALKAN. WAA INAAN LA QABSANAA XAALKEENA HADDA.




GAROONKA UGU WEYN EE MAGAALADA ...

KURAASTA DAAWADAYAASHA EE LABADA DARAF AYAA BLUXSAMAY IYAGOO DAAWANAYA KOOXDA BURHAAN OO LA CIYAAREYSA KOOXDA MAGAALADA

WILKAAGU WAXA UU LEEYAHAY KARTI BADAN, LAAKIIN WUU YAR YAHAY... ..






...QALAFSAN WAAN OGAHAY. ISAGA AYAAN LI WELWELAYAA.



MID KA MID AH WEERARYAHANKII MAGAALADA OO SI XAWLI AH LIGI WAJAHAN BURHAAN OO QALLAFSAN.



BURHAAN OO HAKIYAYA WEERARYAHANKII, LAAKIIN WUU QALLAFSAN YAHAY OO WEERARYAHANKA WUU DHACAYAA.



PPRRRR RRRRPT!

RIGOORE!

KADIB FIIDKAAS.

HADDABA HADDA WAAN GULLDARREYSANAY, HALKEE AYAAN KU CIYAARI DOONNAA

DAGAALKII LIIBAAN KA DIB, KOOXDIISU WELIGEED MA RABI DOONTO INAY NALA CIYAARTO.

QOFNA MANALA CIYAARI DOONA!




CAGTII JOOGSAN WEYDAA, MAR BAY CEEB LA KULANTAA.

KHALAD BAAD SAMEYSAY LAAKIIN MAAHA IN LAGUUGU QEEX, WIILKEYGIYOW. QIRASHADA KHALADAADKEENA NAGAMA DIGEYSO KUWO DACIIF AH, LAAKIIN KUWO AWOOD LEH; WAXAY NAGA CAAWINEYSAA XALLINTA KHILAAFKA...




LIIBAAN, AAMINA IYO KOOXDA BARAKACAYAASHA OO SOO GALAY GAROONKA KUBADDA CAGTA KAAS OO AY QARIYEEN TUULMO CIID AH.






SIDAAN AYEEY KU BILAABANTAY
DHANKA GURIGEENA. QAABKA AY
CIIDDU ULA WAREEGTAY DHULKA
OO DHAN.



?!

?!

MAR WALBA
SIDAN MAY
AHEYN.




" INTAADAN DHALAN KA HOR, WAXAA JIRI
JIRAY GEEDO IYO CAWS KA BAXA
DHAMMAAN HAREERAHAAN.

DHIRTA AYAA NAGA ILAALIN JIRTAY
DABEYLAHA AADKA U DARAN IYO
CADCEED. "




" XOOLUHU CAWSKA AYAY DAAQEEN."




" WAXAANA JIRAY CEEL-BIYOOD LEH BIYO AAD U BADAN EE DHAMMAAN BULSHADA HALKAAS SOO MAREYSA KU FILAN..."


" LAAKIN CIMILADII WAA IS BEDDESHAY OO DHULKII WUU ASIIBMAY..."



MARKA U DHULKU ASIIBMO WAXAAN DAREEMEYNA XANUUNKA UGHU BADAN.




DUGSIGA, WAXA NALA BARAY HABABKA DIB LOOGU SOO CELINAYO DHULKA UU SAAMEEYAY ISBEDDELKA CIMILADU.




WAXAA JIRA SIYAABO LAGU BOGSIIYO DHULKA, LAAKIIN FAR KELIYA FOOL MA DHAQDO. WAXAAN U BAAHANAHAY GACMO BADAN SI AAN U SAMEYNO.

WAXAAN IDIIN SIIN KARAA HAL LAMAANE.




BURHAAN!?

AAWAY KOOXDAADII?




WAY IGA XANAAGSAN YIHIIN. WAXA AAN U SABABAY IN AAN KU GULDARREYSANO CIYAARTA..

LAAKIIN WAXAAN RABAA INAAN IYAGA ISKA SAXO, OO WAXAAN RABAA INAAN ISKAKAA SAXO. WAAN KA XUMAHAY SIDA AAN U CIYAARAY.



WAXAA LAGA YAABAA INAAN BARAN KARNO INAAN LA CIYAARNO, OO AANAN ISKA HOR IMAANIN.




RATIGA DAMBE, RATIGA HORE SAANQAADKIISUU LEEYAHAY ADIGA, CARRUURTAYDA, WAA INAAD HOGGAAMISAA, WAANA INAAD HESHA HOGGAAMIYEYAAL KALE.




WAA IN AAN MIDEYNO BEELAHA KA SOO JEEDA MAGAALADA IYO XERADA. WAA IN AAN KU QANCINO QOF WALBA IN AYSAN AHEYN BADBAADIN HAL BEER OO KELIYA, LAAKIIN FICILLADA AAN HALKAN KU QABANNO AY FAA'IIDO U LEEYIHIIN DHAMMAAN DADYOWGA. FAAFI FARIINTAN...




" ...DHALINYARADAAY..."



" ...GABDHAAHA DA'IDA YAROW..."



"...RAGGA WAAYEELKA AHOW..."



"...IYO HOOYOYINKA IYO HAWEENKA, BEERALEYDA BULSHOYINKEENA. WAXAY YAQAANAAN GEEDAHA IYO CAWSKA ASLAKA AH EE UGU MUHIIMSAN."

"...IYAGA AYAA AH KUWA UGU BADAN EE KA HADLAY OO KA SHAQEEYA SIDII BULSHOYINKA LOO WADA ILAALIN LAHAA."



AQOON LA'AANI WAA IFTIIN LA'AAN.

WAXAAN KA FAA'IDEYSAN DOONAA XIKMADA WAAYEELKA, IYADOO AY LA SOCOTO HAL-ABURKA DHALINYARADA.

WAXAAN KU BILAABI DOONAA BEERISTA GEEDO YAR EE AH GEEDAHEENA ASALKA AH.



" WAXAAN ILAALIN DOONAA GEEDAHAAS IYADOO LA ABUURAYO BUDHCAD CARRO AH KUWAAS OO QABAN DOONA BIYAHA ROOBKA OO TAAGEERAYA KORITAANKA GEEDAHAYAGA..."




WAXAAN TAAS KU LAMAANAYN DOONAA IN LA BEERO CAWSKA, KAAS OO U BIXI DOONA SI UH U XIDHO CIIDDA LOOGANA HORTAGO NABAAD GHURKA. CAWSKAN AYAA SIDOO KALE U ADEEGI DOONA CUNNO XOOLAHEENA WAXAANA LOO ISTICMAALI DOONAA ILLO AY KU NOOLAADAAN XUBNAHA BULSHADA.




WAXAAN KA QAADAN KARNAA FIKRADO WANAAGSAN OO KA IMANAYA DADYOWGA KALE EE ADDUUNKA OO LA KULMAY CAQABADO TAN OO KALA AH. SI LOO CARGALADEEYO DABAYSHA, WAXAAN KA ABUURI KARNAAGABYO DABAYSHA OO KA SAMEYSAN DHAR DULUG AH OO KU DHEJI AGAGAARKA GAROONKA.




WAXAY QAADAN DOONTAA WAKHTI IN LA ARKO NATIJOYINKA FICILADEENA, LAAKIIN WAY U QALMI DOONTAA.




" SHAN SANNNO KADIB... "



" JAAKADAHA DIFAACA
DABEYSHA OO KA
SAMEYSAN JAWAANO
LAGU BLUXIYAY CIID. "






DADKA AYAA KACSAN.
WAA SAF CAJIIB AH...
HADDII AAN SIDAAS IRAAHDO
NAFTAYDA.



MA JECLI INAAN XIGSADO KUIWA
LIGI CADCAD, LAAKIN KOOXDA
ORANJIGA, WAXAAD HAYSATAAN
DIFAACA CAJIIBKA AH EE
BURHAAN, IYO WEERARYAHANKA
WEYN EE LIIBAAN.

PPPPRRRRRRRPT!




CIYAARTA
AYAA
BILAABANAYSA !

Safaaradda Boqortooyada Danmaak waxay ku faaneysaa inay taageerto buuggan majaajilada ah, taasoo nolosha ku soo kordhisa doorka wax-ka-beddelka ah ee dhalinyarada Soomaaliyeed ee nabad-dhisidda iyo soo celinta deegaanka. Mar haddii isbeddelka cimiladu uu sii kordhayo, waa dalalka sida Soomaaliya oo kale ah – kuwa ugu yar ee ka qeyb qaatay qalalaasaha caalamiga ah – kuwaas oo dareemaya saameynteeda. Cadaadiska deegaanka ayaa inta badan sii qoto dheereeya caqabadaha jira, bulshooyinka oo cakiran iyo, mararka qaarkoodna, colaado huriya. Welibana, iyada oo ay jiraan tijaabooyinkan, dhalinyarada Soomaaliyeed ayaa weli ah tilmaanta adkeysiga, wadaana xalal cusub oo waara.

Iyadoo loo marayo mashruuca "Nabadda Cagaaran" ee Dowlad Goboleedka Hirshabeelle. Danmaak waxaa ka go'an inay ka caawiso bulshooyinka Soomaaliyeed inay ka hortagaan caqabadaha is-daba-jooma ee cimilada, nabadda, iyo amniga. Dadaalkan ayaa ujeedadiisu tahay in la kobciyo isbeddelka bulsheed iyo kaabeyaasha labadaba, xoojinta bulshooyinka ka soo horjeeda khataraha laba geesoodka ah ee isbeddelka cimilada iyo colaadaha.

Waxaa sharaf noo ah inaan garab istaagno beelaha Soomaaliyeed dadaalka ay ugu jiraan dhisitaanka mustaqbal nabad ah oo waara. Buuggaan majaajillada ah wuxuu ka tarjumayaa ruuxooda iyo go'aankooda, waxaana rajeyneynaa inay ku dhiirigeliso kuwa kale inay ku soo biiraan abuurista berrito ee ifaysa.

Mudane, Steen Sonne Andersen



**MINISTRY OF FOREIGN AFFAIRS
OF DENMARK**

Majaajiladaan waxaa suurta geliyay iyada oo loo marayo taageerada deeqsinimada leh ee Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada iyo Xukuumadda Federaalka Soomaaliyeed, iyadoo ay maalgelinaysa Qalabka Siyaasadda Dibadda ee Midowga Yurub iyo Wasaaradda Arrimaha Dibadda Denmark. Waa natiijada dadaal iskaashi oo dhex maray Hay'adda Caalamiga ah ee Socdaalka, Berghof Foundation, iyo Machadka Cilmi-baarista Nabadda ee Stockholm.



Funded by
the European Union



MINISTRY OF FOREIGN AFFAIRS
OF DENMARK
Danida




Berghof Foundation



Waxaa soo saaray Freehand Studios

Qore

La-taliyaha Dhaqanka

Qaabeynta & Xarafeynta

Isku-dabaridka

Khadka shaqada

Midabka

Njogu Macharia

Deqa Abshir

Movin Were

Steven Muchiri

Fridah Maina Muyu

Michelle Zadia Pike



